



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WARSAXAAFADEED 009/2011

Ergaygga Gaarka ah ee Xog-hayaha Guud ee Qaramadda Midoobay oo soo dhoweyey heshiiska Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka

Nairobi, 9 June 2011 – Ergaygga Gaarka ah ee Xog-hayaha Guud ee Qaramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya (SRSG) Dr. Augustine P. Mahiga ayaa muujiyey sida uu raali uga yahay heshiiska ay ku kala saxiixdeen Magaalada Kambla Madaxweynaha Soomaaliya, Sheikh Sharif Sheikh Ahmed iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka, Sharif Xassan Sheikh Aden, heshiiskaas oo uu marti geliyey Madaxweynaha Uganda, Yoweri Museveni, uuna fududeyey Qabsoomiddiisa Danjire Mahiiga. SRSG Mahiiga waxen shee gay in heshiisku uu yahay mid lagu xalinaayo khilaafkii siyaasadeed ee ka jiray Muqdishu 5tii bilood ee la soo dhaafay, khilaafkaas oo ku saabsanaa habkii loo dhammeen lahay xilga kala guurka iyo sida uu noqonaayo hanaanka siyaasadda xiliga kalaguurka ka dib.

Heshiiskan oo loo yaqaano “Is-afgaradka Kambla’ aya madaxweynaha iyo baarlamaankuba midwalba loogu kordhiyey mudadii uu xafiiska heyn-laha hal sano, ayada oo lamagacaabi doono Raisul-Wasaare cusub mudo 30 casho gudahooda ah.

SRSG-ga wuxuu yiri “waxaa looga baahanyahay saxiixayaasha heshiiska in ay siyaasad ahaan u gadaan heshiiska, taageerana ka raadiyaan dadka ay khuseyso arrinta sida mas’uulinta Gobalada iyo jaalayaasha kalaba. Waxaa kaleeto oo uu ku guubaabiyey (mas’uulinta saxiixday heshiiska) in ay dhameystiraan meelmarinta heshiisyadii ay horay loola galay jaalayaasha Soomaaliyeed sida Puntland iyo Ahlu- Sunnah Waljameeca.

“ Waxaan ku Faraxsa nahay in aan si wax tar leh xal ugu helnay ismarin waagii” ayuu yiri Dr. Mahiiga. “Madaxdu si wax tar leh ayey isula shaqeysay si ay u gaaraan heshiiskan wax tarka leh. Waana in loo hambalyeya Madaxda. Waxaa kale oo aan si niyad ah ugu mahadcelinaya Madaxweyne Museveni oo taageero aan leexleexad laheyn mujiyey usbuucii la soo dhaafay”.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org



Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

Madaxweynaha Soomaaliyeed iyo Gudoomiyaha Baarlamaanka waxay balan qaadeen in si wadajir ah isula shaqeyn doonaan mudadaan halka sano ah ee ku-meel gaarka ah si ay u hirgeliyaan arrimaha muhiimka ah kuwaas oo ku cad qorsha hawleedka waqtigiisa, shuruudihiiisa, iyo habka loogu hogaan-sanaanayo qorsha hawleedka intaba lagu heshiindoono.- Waxaana kamid ah arrimahaan sameynta Gudi heer madaxweyna yaal ah kana kooban madaxda gobalka. Arrimmaha muhiimka ah ee la xalinaayo waxaa ka mid ah dhameystirka iyo ansixinta dastuurka, dib uhabaanta heyadaha dawladda, horumarinta ammniga iyo dib udhiska qeybaha ammniga, siiwadista arrimmah dib u heshiisiinta, hirgelinta adeegaya iyo maamulka bulshada si loo xaqiijiyo xasilinta dhulka laga qabsaday kooxaha hubeysan, horumarinta habka isla xisaabtanka ku fadhiya iyo diyaargaraynta doorashooyinka,

Tafaasiisha ku saabsan qorsha hawleedka kor ku xusan iyo sida loo hirgelinaayaba waa laga shaqeyndoona usbuucada soo socda, waxaana ka doodi doona dad badan oo arrintu ay khuseyso sida dawladda federaalka ku meel gaar ah iyo baarlamaanka. Waxaana qabsoomida shirkan fududeyn doona SRSG ama Ergayga Gaarka ah.

Baaxada iyo ajendada shirka aan soo sheegnay waxaa si wadajir ah u go'aamin doona gudi ka kooban TFG-ga, Baarlamaanka, Gal-Mudug, Puntland, UN-ka, AU-da, iyo IGAD.

“Si uu Shirkaani u noqdo mid mira dhala, waxaa loo baahan yahay in loo dhamaado”, ayu yiri Mahiiga. “ Madaxda Soomaaliyeed, waxaa hadda looga baahan yahay in ay diiradda saaraan habkii loo hirgelin laha isbedel, sii wadidda nabad iyo xasilooni ku soo celinta Soomaaliya iyo dhammenta arrimmaha ku-meel gaarka ah.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

www.unpos.unmission.org